



**WASAARADDA CAAFIMAADKA & DARYEELKA BULSHADA
DOWLADDA FEDERAALLKA SOOMAALIYA**



Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka: Soomaaliya, QM ayaa dhammaan daneeyayaasha ku tirtirsiiyey in ay laba-laabaan dadaalka lagu sugayo bedqabka hooyada iyo carruurta dhowaan dhashey inta uu jiro cudurka dunida ku baahey ee COVID-19

Muqdisho, 17 Sebtembar 2021 – Iyada oo shaley u dabaaldegeysay Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka, ayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo ay iskaashanayaan Ururka Caafimaadka Adduunka ee WHO, Hay'adda Qaramada Midoobey ee Carruurta (UNICEF) iyo Hay'adda Qaramada Midoobey ee Dadweynaha (UNFPA), waxaa ay xarumaha caafimaadka, shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo daneeyayaasha kale ku dhiirrigeliyey in ay kor u qaadaan dadaalladooda si loo hubiyo sugidda bedqabka hooyooyinka iyo carruurta dhowaan dhashey.

Farriintan waxay ka turjumeysaa hal-ku-dhegga sanadka ee Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka – ‘Hooyada iyo ilmaha dhowaan dhashey oo loo daryeelo si uu bedqab ku dheehan yahay’ – waxaana ay imaanaysaa waqti cudurka *coronavirus-2019 (COVID-19)* uu carqaladeeyey adeegyada caafimaadka aasaasiga ah ee guud ahaan dalka ee horeyba culeysku u saarnaa.

Sahan joogto ah oo gaaban (*'pulse survey'*) oo dalka oo dhan ay WHO ka waddey muddo toddoba bilood ah oo ka mid ahaa sanadaha 2020 iyo 2021 oo lagu eegayey sida ay adeegyada aasaasiga ah uga sii socdaan Soomaaliya ayaa lagu ogaadey in, muddadii u dhaxaysay Maajo-Sebtember 2020, ay 33% adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka hakadeen (mid ka mid ah saddexdii adeegba), halka muddadii u dhaxaysey Jannaayo – Maarso 2021, in ay hakadeen 12% adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka (lix ka mid ah 51gii adeegba), taas oo muujineysa in hakad mug leh uu sii jirey xataa hal sano ka dib markii uu bilowdey cudurkan dunida ku baahay. Lix ka mid ah adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka ee ugu waaweyn ee hakad mug leh lagu arkey waxaa ka mid ahaa caafimaadka taranka, hooyanimada, carruurta dhowaan dhashey, adeegyada caafimaadka ee carruurta iyo kuwa dhallinta dhowaan qaangaarey, kuwaas oo uu soo wajahay hakad u dhexeeya 5-50%, iyo adeegyada tallaalka, oo uu soo gaarey hakad u dhexeeya 5-20%.

Xataa ka-hor intii aan la soo xaqiijin in uu COVID-19 ka dillaacay Soomaaliya, ayaa la sii ogaa in uu dalku ka mid yahay dalalka uu ugu badan yahay umul-raaca dunida oo dhan, kaas oo ah 692 umul-raac 100,000-ba, iyo carruurta dhowaan dhashey ee dhinta oo ahaa 40 dhimasho 1000 nolol ku dhashaba.

“Ka hor cudurka dunida ku faafey ee COVID-19, ayaa 68% haweenka imaan irin xarumaha caafimaadka si ay u helaan daryeelka ka horreeya dhalimada oo saddex-meelood meel keliya ayaa ay ka umulin jireen xirfadlayaal caafimaad oo u tababaran,” ayaa ay tiri Dr Fawziya Abikar Nuur, Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Soomaaliya. “Tan iyo markii la xaqiijiyey in cudurka dunida ku faafey ee COVID-19 uu soo gaarey Soomaaliya, waxaa mar walba hoos u sii dhacaysey tirada haweenka u yimaada in ay caawimo helaan. Waxaan jeclaan lahaa in dhammaan wada-hawgalayaasha aan ku dhiirrigeliyo in ay dib uga fekeraan istiraatiijiyadaha si ay u hubiyaan in haween uur leh oo ka badan kuwa hadda ay xarumaha caafimaadka u yimaadaan si ay u helaan daryeelka ka horreeya dhalimada, ugu umulaan, ayna uga helaan tallaalka, si carruurta da'da yar ay noloshoodu bedqab ugu bilaabaan.”

Iyada oo qayb ka ah xuska Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaannada ee sanadkan, ayaa dhammaan wada-hawlgalayaasha, oo uu ka mid tahay WHO, ay dhammaan daneeyayaashu ku dhiirri-gelinayaan in ay “Hadda u tallaabo-qaadaan sidii dhalimada looga dhigi lahaa mid amaan ah oo uu ixtiraam ku dheehan yahay.” In la hubiyo in si habboon oo ixtiraam uu ku dheehan yahay loola dhaqmo haweenka iyo carruurtooda yaryar ayaa sii kordhineysa kalsoonida lagu qabo xarumaha caafimaadka, ka-faa'iideysiga adeegyada iyo taageero laga helo bulshooyinka.

“Waa in aan si joogto ah u kobcinnaa kartida shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee jooga goobaha daryeelka lagu bixinayo, annaga oo islamarkaasna joogteynayna heerarka ugu sarreeya ee nadaafadda iyo bedqabka si looga hortago in cudurradu faafaan iyo si loo hubiyo in bukaannadu bogsadaan,” ayaa uu yiri Dr Mamunur Malik, oo ah Wakiilka WHO ee Soomaaliya. “Islamar-ahaantaana waa in aan xubnaha qoyska, oo ay ka mid yihiin ragga, ku dhiirrigelinnaa in ay hooyooyinka uurka leh keenaan xarunta caafimaadka ee ugu dhow si ay u helaan daryeelka joogtada ah ee ka-horreeya dhalimada iyo si looga umuliyo, si looga hortago in haweenka iyo carruurta ay u dhintaan sababo laga hortegi karo iyo daryeel aan amaan ahayn. Haddii aan sameyno dadaal wadajir ah, waxaan badbaadin karnaa nafa badan, laakiin waxaa dhammaanteen nalooga baahan yahay in aan hadda tallaabo-qaadno si aan is-beddel u dhalinno.”

“In uu haystaan qof xirfad u leh – dhakhtar, kaalkaaliye caafimaad ama umuliso tababar wanaagsan qaba – waqtiga ay uurka leeyihiin, xilliga dhalimada iyo ka dibba, ayaa muhiim u ah in ilmo kasta oo Soomaali ah bilowga noloshiisaba la siiyo fursad uu ku badbaado kuna baraaro,” ayaa uu yiri Maxamed Ayoya oo ah Wakiilka UNICEF Somalia. “UNICEF waxaa sharaf u ah in ay Dowladda Soomaaliya kala shaqeyso kor-u-qaadista dadaalladeeda lagu gaarayo haweenka iyo carruurta nugul, ee ku nool degaannada ugu saboolsan ee ay haystaan xaaladaha nololeed ee ugu adag, ee uguna baahi badan kaalmada, inta uu jiro cudurka dunida ku faafey ee COVID-19.”

“Hooyo kasta waxaa ay xaq u leedahay in ay bedqab ku dhasho iyada oo ay marka ay dhaleyso la joogto cid xirfad u leh ka-umulinta. Adeeggan waa mid la ballaarin karo si loo gaarsiiyo dadka adeegga ay helaan uu yar yahay iyo kuwa danyarta ah ee ku nool guud ahaan dalka. Tani waxaa lagu xaqiijin karaa iyada oo loo marayo wada-shaqeynta hadda socota ee lala leeyahay hay’adaha dowladda iyo adeegyada ay bixiyaan xubnaha waaxda aan dowliga ahayn,” ayaa uu yiri Anders Thomsen oo ah Wakiilka UNFPA.

Mudane Thomsen ayaa sheegey in umuliso xirfad leh oo haweenka ka dhalisa ay tahay waxqabad caafimaadka guud la xiriira oo lagu yareynayo dhimashada iyo xanuunnada hooyada iyo carruurta dhowaan dhashey. “UNFPA ayaa sii wadda maalgelinta dadaalkan iyada oo iskaashi dhow la leh Wasaaradda Caafimaadka, iyada oo taageereysa xarumaha caafimaadka ee bixiya adeegga naf-badbaadinta ah ee ka-umulinta haweenka iyo sidoo kale iyada oo hubineysa tababaridda umulisooyin Soomaaliya siiya fursadda ugu wanaagsan ee si dhab ah ay daryeel naf-badbaadin oo amaan ah ku gaarsiin karto dadweynaha adeegga ugu yar hela ee ku dhaqan guud ahaan dalka,” ayaa uu yiri Mudane Thomsen.

Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka ee la asteeyey sanadkii 2019 waxaa lagu higsanayaa in la dhiirrigeliyo fahmidda bedqabka bukaanka, kordhinta ka-qaybgalka dadweynaha ee bedqabnimada daryeelka caafimaadka, iyo dhiirrigelinta in dunidu ay qaaddo tallaabo looga hortegayo laguna yareynayo dhibaata laga baaqsan karo ee la xiriirta daryeelka caafimaadka. Sanadkan, munaasabadda Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka, ayaa WHO, UNICEF iyo UNFPA waxaa ay ballanqaadeen in ay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Federaalka gacan ka siiyaan bilaabidda waxqabadyo iyo hawlo cusub ay ku soo kordhineyso guud ahaan xarumaha caafimaadka ee dalka, taas oo hubineysa in sanad walba la xaqiijiyo daryeel amaan ah oo ay helaan hooyada iyo carruurta dhowaan dhashey.

Macluumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir:

Khadar Xuseen Maxamuud – Madaxa Isuduwidada iyo Isgaarsiinta, Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka, coordination@moh.gvo.so, +252615602637

Fouzia Bano – WHO Chief of Staff ai, Communications Officer, banof@who.int; +252 619 235 880

Eva Hinds – UNICEF Communication Manager, ehinds@unicef.org; +252 613 642 635

Pilirani Semu-Banda – UNFPA Communications and Partnerships Specialist, semu-banda@unfpa.org; +254 734 500 439

Qoraalo loogu talogaley Tifaftirayaasha:

- Maalinta Caalamiga ah ee Bedqabka Bukaanka ayaa sanadkii 2019 waxaa lagu asteeyey shirkii 72aad ee Golaha Caafimaadka Adduunka (*World Health Assembly*) ka dib markii la ansaxiyey qaraarkii WHA72.6 – “*Global action on patient safety/Tallaabo-qaadkii Caalamiga ahaa ee bedqabka bukaanka*”. Maalinta waxaa ay ku qotontaa mabda’a aasaasiga ah ee caafimaadka – ugu horreyn ha dhibaateyn.
- Waxyaabihii lagu soo ogaadey wareeggii labaad ee sahanka qaran ee joogtada ah ee gaaban (*pulse survey*) oo dalka oo dhan ay WHO ka sameysey intii uu socdey cudurka COVID-19 ee dunida ku faafey waxaa laga heli karaa: <https://www.who.int/teams/integrated-health-services/monitoring-essential-health-services/national-pulse-survey-on-continuity-of-essential-healthservices-during-the-covid-19-pandemic/dashboard>